Naxdinta Christchurch – sidee ayaan kuu caawin karnaa

Haddii ay ku saameysay naxdinta Christchurch, waxaa jiro taageerada dowladda oo kale duwan oo laguu heli karo – haddii aad ku weysay qaraabadaada, lagu dhawacay, waxaad aheyd goob joog, ama haddii aad taageereysid dadka ay saameysay. Waxaan halkaan u joognaa inaan ku caawino:
Soo wac **0800 779 997** ka bilow 7am - 6pm, Isniinta illaa Jimcaha, iyo 8am - 1pm, Sabtida (saacada New Zealand). Haddii aad ka soo waceysid dibada, taleefonka **+64 4 466 4698**.

Qadka Dowlada 0800 (0800 Government Helpline)

Waad soo wici kartaa 0800 779 997 haddii aad:

- ma caawin laheyd
- ma jeclaan laheyd warbixin badan.

Haddii aad ka soo waceysid dibadda, taleefoonka +64 4 466 4698. Qadka wuxuu furanyahay ka bilow 7am - 6pm, Isniinta illaa Jimcaha, iyo 8am - 1pm, Sabtida (waqtiga New Zealand).

Dhowr haya'dood oo dowli ah ayaa bixin kara taageero dhaqaalah. Waxaa noo suurtogeli karto inaan telefoonka kuugu diyaarino lacag.

Xittaa haddii aadan u maleynin inaad u qalanto caawinta dhaqaalaha, fadlan na soo wac. Waxaa jiro qaabab badan oo ay noogu suurtogasho inaan kuu caawino, oo waxaan kugu tilmaami karnaa jihada saxda ah.

Taageerada Dhibanaha (Victim Support)

Taageerada Dhibanaha waxay bixisaa caawin haddii aad weysay qaraabo, way dhaawacantay, leedahay xubin qaraabo dhaawacmay, ama waxaad goob jog u aheyd weerarka Christchurch.

Yaan caawin karnaa?

- Xubnaha qoyska ee qofka dhintay
- Dadka la geeyay isbitaalka ee weerarka kadib, iyo xubnaha qoyskooda
- Dadka kale ee goob jooga ka ahaa ama si daran u saameysay weerarka

Uma baahnid inaad ahaatid muwaadin NewZealand ama daganaatid si aad u heshid taageeradeena.

Sideen kuu caawin karnaa?

- **Caawinta wax ku oolka ah.** Shaqaalaha taageerada wuxuu ku siin karaa adiga iyo qoyskaaga caawin wax ku oolka ah (sida buuxinta foomamka, arimaha bangiyada, jawaabaha su'aalahaaga, iyo u gudbinta adeegyada kale)
- **Taageerada calool xumida iyo naxdinta.** Shaqaalaha taageerada wuxuu kugu taageeri karaa adiga iyo qoyskaaga dhinaca waqtigaaga calool xumida iyo naxdinta

- **Caawinta dhaqaalaha.** $15,000 xubinta qoys walba ee la dilay, $5,000 qof walba ee isbitaal la geeyay, iyo deeqaha kale ee qarashaadka degdega ah ee ay sababtay naxdinta Christchurch (tusaale ahaan diyaarinada duugta, safarka qoyska iyo hoyga).

Macluumaad dheeraad ah

Taleefonka: 0800 842 846
I-meelka: nationaloffice@victimsupport.org.nz
www.victimsupport.org.nz

ACC (Shirkadda Magdhowga Shilka) (Accident Compensation Corporation)

ACC waa hay'ad dowli ah oo caawin siisaa markii dadka ama xubnaha qoyskooda ay dhaawacmaan ama ayu dhinteen dhaawaca. Caawintaan waxaa loo heli karaa qof walba ee ku nool New Zealand iyo sidoo kale waxaa ku jiro martida New Zealand, haddii ay dhaawacmnaan.

Yaan caawin karnaa?

- Dadka ku dhaawacmay weerarka, qoyskooda iyo dadka taageerada.
- Dadka ku waayay qaraabo weerarka.

Sideen kuu caawin karnaa?

Dhaawacyada

- Bixinta daryeelka caafimaadka.
- **Magdhowga qasaaraha daqliyada.** Waxaan u bixinaa illaa boqolkiiba 80 ee dakhligaaga sida magdhowga toddobaadlaha haddii aysan kuu suurtogaleyn inaad shaqeysid sababtoo ah dhaawaca.
- **Caawinta guriga.** Waxaan ku bixin karnaa taageero nadiifinta daryeelida gurigaaga, oo kugu taageerno howlaha daryeelka shaqsiga sida qubeysashada iyo labisashada.
- **Daryeelka canuga.** Caawinta waxaa laga heli karaa guriga ama xarunta ciyaarta ama dugsiga xanaanada carruurta. Waxaan sidoo kale bixin karnaa daryeelka caawinaya waalidka dhaawacan ee shaqooyinka aan u sameyn karin carruurtooda sababtoo ah dhaawaca, tusaale ahaan labisashada iyo dhaqida.

Qoysaska waayay qaraabada

Waxaan ku caawinaa qarashaadka duugta. Waxaan bixinaa deeqda duugta oo illaa $10,000 oo dhinaca qarashaadka duugta iyo tacsida ah. Wax canshuur ma bixineysid midaan. Waad dooran kartaa inaad ku yeelatid duugta ama tacsida New Zealand ama dibada.

Deeqaha badbaadayaasha oo qoysaska. Qoysaska waxaa sidoo kale u suurtogeli karto inay helaan hal lacag bixin ee lamaanaha dhintay, carruurta iyo dadka ku tiirsan (dadka ku tiirsan iyaga oo taageerada dhaqaalaha). Waxaan siinaa:

- $6,668 xaaska ama lamaanaha

- $3,334 canug walba ka yar yahay18 ama dadka kale uu ku tiirsan yahay. Haddii canuga ama qofka ku tiirsan ka hooseeyo 16, lacagtaan waxay aadeysaa waaladiintooda ama daryeelaha. Wax canshuur ma bixineysid midaan.

Taageerada socota oo carruurta New Zealand. Haddii waalidka ee dhintay leeyahay carruur, qoysaska waxay heli karaan lacag bixinada isbuuclaha si ay uga caawiso daryeelka carruurta oo shan sanno ama illaa canuga ka gaaro 14. Tirada waxay ku xirantahay inta carruur ah oo ka yar 14 jir oo la daryeelo. Ma bixineysid canshuur lacag bixinadaan, laakin waxay saameyn kartaa caawinta aad ka heshid Shaqada iyo Dakhliga (Work and Income). Haddii canuga qabo curyaannimo, waan arki karnaa haddii lacag bixin ay socon karto muddo dheer.

Magdhowga toddobaadlaha oo qoysaska. Haddii qofka dhintay uu ka helayay daqli New Zealand markii ay dhimanayeen, waxaa kuu suurtogaleyso inaad heshid magdhowga dhimashada dakhligaas si loogu taageero qoyska. Waxaan bixinaa illaa boqolkiiba 80 oo ah waxa qofka dhintay helayay. Lacagtaan waxaa loo heli karaa inay taageerto xaaska iyo lamaanaha dhintay, carruurtooda, waxaana heli karaa waaladiintooda ama qaraabo kale oo iyaga ku tiirsaneyd. Haddii dadka ku tiirsan ay ku nool yihiin dibada, waxaa weli u suurtogali karto inay helaan lacag bixino. Lacag bixinada waxay ku xirantahay xaaladaha dadka.

Macluumaad dheeraad ah

Taleefonka: 0800 080 273
I-meelka: christchurchresponse@acc.co.nz
www.acc.co.nz

La talin – haddii aad u baahantahay inaad qof la hadashid

Khadka caawinta (Helpline)

Qof walba wuu soo wici karaa ama fariin qoraal ah ayuu ku soo diri karaa 1737 (ee mobeelka) si uu ula hadlo la taliye tababaran. Waxaad sidoo kale ku soo wici kartaa si lacag la'aan ah lineland-ka 0800 1737 1737. Kani waa adeeg lacag la'aan ah 24 saac.

Booqo dhakhtar

Haddii aad dagantahay New Zealand ama tahay muwaadin waxaad sidoo kale booqan kartaa dhakhtarka deegaankaaga, bilaash ayay noqon kartaa. Haddii aad ka soo safreysid dibada la hadal caymiyaha safarkaaga, booqashooyin ayaa lagu dabooli karaa.

Shaqada iyo Dakhliga (Work and Income)

Shaqada iyo dakhliga waa hay'ad dowladeed ee ku caawiso markii dadka yihiin daqli hooseeyo ama aysan shaqeyn. Tani waxay ku jirtaa taageerada dhaqaalaha, sida faa'idooyinka sida Taageerada JobSeeker (JobSeeker Support) iyo Lacag bixinta joogtada ah ee New Zealand (New Zealand Superannuation).

Yaan caawin karnaa?

Dadka ay saameysay naxdinta Christchurch ama cida u baahan inay u safraan Christchurch sababtoo ah iyada darteed. Looma baahno in aad faa'iido ku jirtid.

Sideen kuu caawin karnaa?

Lacag bixinada dedega ama qarashaadka aan la filaneyn

Waxaa noo suurtogali karto inaan kugu caawino baahiyada qaar ee degdega ah iyo muhiimka ah, sida:

- cunto
- firaashka
- qarashaadka shidaalka iyo safarka haddii aad ku safreysid gudaha New Zealand.

Lacag bixinta hormarsan ee Faa'iidooyinka (Advance Payment of Benefit)

Dadka ku jiro faa'idada ee u baahan inay buuxiyaan baahi degdega ah waxay heli karaan Faa'idada Lacag bixinta Hormarsan oo illaa lix isbuuc ah.

Faa'idooyinka Gurmadka (Emergency Benefit)

Dadka aan u qalmin wax faa'ido ah.

Waayid dhaqaalaha

Waxaa kuu suurtogeli karto inaad heshid Lacag bixinta Difaaca Rayidka (Civil Defence Payment) oo qasaaraha daqliga haddii ay:

- goobtaada shaqada ay xirantahay (sida haddii ay tahay xadeynta gudaha Booliska)
- u safri karin shaqada sabab la xiriirto dhacdooyinka Christchurch ee Jimcaha 15 Maarso
- u baahantahay inaad la joogtid qoyska ama whānau.

Weli waad codsan kartaa haddii aad ku jirtid fiisada shaqada ku meelgaarka ah (sida shatiga shaqada) oo aad shaqeyneysay waqtiga naxdinta.

Waainaad ka tagtaa gurigaaga

Waxaa kuu suurtogeli karto inaad heshid Lacag bixinta Difaaca Rayidka oo qarashaadka kale haddii:

- aadan tagi karin gurigaaga, sababtoo ah waxaad ku nooshahay aaga ay kaa xanibeen Booliska
- aad siineysid meel ay joogaan saaxibada ama qoyska, ama
- ma uga baahantahay caawin baahida, dharka iyo firaashka sababtoo ah ma tagi kartid guriga.

Macluumaad dheeraad ah

www.workandincome.govt.nz

Daqliga Inland (IR)(Inland Revenue)

Dakhqliga Inland waxay siisaa tallo iyo taageero ee ku saabsan canshuurta dhammaan shaqsiyaadka, qoysaska iyo ganacsiga. Waxaan sidoo kale ku caawin karnaa inaan hubino inaad heshid u qalmida saxdia ah oo U shaqeynta Deynta Canshuurta Qoysaska (Working for Families Tax Credits) iyo Taageerada Canuga (Child Support).

Yaan caawin karnaa?

Dadka ay saameysay weerarka ee su'aalo ka qabo canshuurta (labadaba shaqsiga ama arimaha canshuurta ganacsiga).

Tani waxaa ku jirto su'aalaha laga yaabo inaad qabtid haddii aad u baahantahay warbixin:

- Shaqada Deymaha Canshuurta Qoysaska (Working for Families Tax Credits)
- Taageerada Canuga (Child Support)
- Deymaha Ardayga (Student Loans)
- KiwiSaver

Sidee ayaan u caawin karnaa?

Waan ognahay in su'aalaha ku saabsan canshuurta inay noqon doonin waxa aad u maleyso hadda. Markii aad diyaar tahay, waxaan halkaan u joognaa inaad bixino macluumaad iyo taageerada aad u baahantahay. Fadlan naga soo wac **0800 473 383** wax walba ee u dhaxeeyo 8am - 8pm Isniinta illaa Jimcaha iyo 9am - 1pm Sabtida. Waxaan sidoo kale u diyaarin karnaa dadka xafiiska bulshada Dakhliga Inland si ay kuula kulmaan markii ay ku haboontahay.